

# FUR TELEFISHINKA CUSUB EE DIGITALKA!

DEG-DEG MA JIRAA

TV-ga Finland oo ku wareegi doono habka loo yaqaano digitalka. TV-ga oo la cusbooneysiin doono wixii ka danbeeya 31.8.2007. TV-ga Finland wuxuu u gudbi doonaa casriga cusub.

Baahinta barnaamijka tv-ga waxay si tartiib-tartiib ah ugu wareegi doonaa habka digitalka, taasi waxay keenaysaa in daawadayaasha ay yeeshaan galab u sahla farsamada digitalka.

Gebi ahaan warbaahinta tv-gu waxay digitalka isugu beddeli doontaa taariikhdu markay tahay 31.8.2007. Hirgelinta farsamada digitalka waxaa loo diyaariyey muddo illaa xad ah, si ay dadweynuhu ugu diyaargaroobaan oo ay wixii qalab ah u soo diyaarsadaan ugu soo talogalaan. Haddaba qalabka waa in la heystaa wixii ka horreeya taariikhda dusha ku xusan.

Carsiga cusub ee teknolojiyada walegeyd sidaa ma ahaaneyso, sababtoo ah dhinaca wargelinata waxaa jira habab fudud jabana, sidaa daradeed cusbooneysiinta qalabka telefishanka waxay dowlada Finland u aragtaa lagama maarmaan.

Sidoo kale telefishanka wadamada kale ee Yurub waxuu ku wareegi doonaa dhanka digitalka. Markaad ku fiirsaneyso qalabta digitalka tv-ga codka iyo sawirka ka laga soo deynayo waa uu ka wanaagsan yahay kan caadiga ah iyo kanaalo badan ayaa laga soo deynayaa.

Mustaqbalka dhanka telefishanka waxaad u istimaali doontaa habab badan (dalabaada tigidka, arimaha bankiga, ka qeyb qaadashada cayaaraha lacagta iyo wixii la mid ah).

Telefishinkaagii hore adigoo heyseto ayaad waxaad u baahan tahay sanduuqa digitaalka loo yaqaan (digibox) inaad ku xiroto. Micnaha telefishinkaagii hore uma baahna inaad tuurto. Ama waxaad soo gadan kartaa telefihin cusub oo wata qalabka digitaalka. Markaad sanduuqa digitaalka oo kaliya ku xiraneyso ayaa ka jaban, markaad soo gadaneyso telefihin cusub. Marka telefihin kastaa waxaa uu u baahan yahay sanduuq digitaalka ee qaas u ah. Sanduuqa digitaalka noocya badan ayuu u kala baxaa. Tasoo ku xiran hadba gurigaad degen tahay. Haddii guriga aad degen tahay uu leeyahay xariga isgaarsiinta ee telefishinka (keybalka) ama nooca anteenada sanduuqa digitaalka ee ku haboon waxaa ka soo iibsana kartaa dukaanka qalabka guriga iibiya. Iibiyaha qalabka korontada ayaad weydiin kartaa sanduuqa digitaalka ee ku haboon gurigaad deggan tahay.

Intaadan soo gadan sanduuqa digitaalka ka hor, waa inaad weydiisaa mas, uulka guryaha ama kambaniga qaabilsan guryaha, gurigaad deggan tahay nooca ku haboon inaad soo gadato. Haddii telefishinka kuu yaala uu wato iskuxiraha-SCART uma baahnid inaad soo iibsato telefihin cusub. Kugu filan inaad soo iibsato sanduuqa digitaalka. Intaadan sanduuqa digitaalka soo iibsana, waa inaad ogaataa ma waxaad rabtaa inaad iibsato sanduuqa digitaalka ee caadiga ah, mise midka wata kaarka. Sanduuqa digitaalka ee kaarka wata waxaad ka fiirsana kartaa kanaalo badan oo kala duwan ee lacag laga bixiyo. Mise waxaad u baahan tahay inaad duubato warbaahinta kanaalada laga soo daayo, sidoo kale ma u baahan tahay inaad ka duubato kanaalada caalamiga ah.

